IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية الجريدة

Sannadka 15aad Muqdisho, 1da Abriile 1987, Lambar 4

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومالية الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar walba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda - dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay waxaa ka bilaabmaa 1. Janaayo. Qiimaha qortiinka F. R. kaliya

sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoraalada waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 6 ee 12 Feb. 1987, Sharciga Waxbarashada Guud J.D.S. BOG. 212

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 8 ee 20 Jen. 1987, Magacaabid Nootaayo. » 228

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE, IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 27.1.87, Lumid Buug Kayd L. 26046 ku qoran Maxamed Cusmaan Bucul L. 80 » 229

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 16.3.87, Lumid Buug Kayd L. 48[illegible] ku qoran Saciid Maxamed Ingiinayare L. 81 » 230

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 16.3.87, Lumid Jeeg War. L. 0592229 ku qoran Maxamuud Maxamed X. Ibraahim L. 82 » 231

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 15.3.87, Lumid Jeeg War. L. 061908 ku qoran Maxamuud Cumar Xajane L. 83 » 232

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 21.3.87, Lumid Jeeg War. L. 757051 ku qoran Caasha Cumar Maxamed L. 84 » 234

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 4.9.86, Lumid Jeeg War. L. 0032511 ku qoran Jaamac Maxamed Faarxye L. 85 » 233

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 2.3.87, Lumid Jeeg War. L. 0711566 ku qoran Daahir Axmed Xuseen L. 86 » 235

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 31.3.87, Lumid Jeeg War. L. 0592154 ku qoran Daahir Xasan Cali L. 87 » 236

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 31.3.87, Lumid Jeeg War. L. 0618472 ku qoran Aamina Maxamed Ducaale L. 88 » 237

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 31.3.87, Lumid Jeeg War. L. 0614536 ku qoran Ceydiid Ibraahim Cali L. 89 » 238

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 20.8.86 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Aadan Jaamac Daahir iyo Xuseen Suudi

## S IX I D Q A L A D

FAAFINTA RASMIGA AH EE L. 7 ee 2 Luuljo 1986, Bog. 493

ku qoran yahay Caydaruus Shariif Caydaruus Abubakar, waa in loo akhriyaa sida hoos ku qoran.

CAYDARUUS SHARIIF ABUUBAKER CAYDARUUS.-

QAYBTA KOOWAAD

# SHARCI

Sharci lambar 6 taariikh 12 Feb. 1987, Sharciga Waxbarashada Guud ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

## MABAADI'DA GUUD IYO NIDAAMKA WAXBARASHADA

### Qod. 1aad
(Caddeyn)

Marka Sharcigan laga hadlaayo, erayada hoos ku qoran mid waliba waxa uu leeyahay micnaha ku hor qoran:

1. WASAARADDA: Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.
2. WASIIRKA: Wasiirka Waxbarashada iyo Barbaarinta.
3. HEER WAXBARASHO: muddo waxbarasho oo sannado xaddidan leh.
4. NIDAAM WAXBARASHO: qaab lagu habeeyo waxbabarasho heerar kala duwan leh.
5. WAXBARASHADA TOOSKA AH: Waxbarashada caadiga ah ee ku dhisan nidaamka heerarka waxbarashada, sida heerka koowaad, labaad iyo saddexaad.
6. WAXBARASHADA AASAASIGA AH: Waxbarashada loogu talo galay da'da u dhexeysa 6 jir ilaa 14 jir.
7. WAXBARASHADA DADBAN: Waxbarasho nidaamsan oo ka baxsan waxbarashada tooska ah.
8. MU'ASAASAD WAXBARASHO: Hay'ad waxbarasho oo aaney Dawladdu lahayn.
9. WAXBARASHO AHLI AH: Waxbarasho ay bixiso Mu'assasad waxbarasho;
10. WAXBARASHADA GAARKA AH: Waxbarasho loogu talo galay dadka naafada ah;

11. MANHAJ: Dhammaan waxbarashada qorsheysan ee loo gudbiyo arday;

12. MUCASKAR: Xarunta lagu fuliyo nashaadka ardayda.

13. QIIMEYNTA WAXBARASHADA: Hab lagu ogaado xaaladaha waxbarashada si loo helo xog sugan oo lagu gaari karo go'aan hagaagsan.

Qiimeynta waxbarashadu waxay ku saabsanaan kartaa nidaamka waxbarashada guud ahaan ama xubnihiisa qaarkood sida qiimeynta waxbarashada ardayda, barnaamijyada waxbarashada iyo maamulka waxbarashada.

Qod. 2aad

(Mabaadi'da Guud ee Waxbarashada).

Waxbarashadu waa xaq dastuuri ah oo qof kastaa uu leeyahay. Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxa ay Muwaadinka siineysaa waxbarasho:-

1. Barta Diinta Islaamka iyo ku dhaqankeeda;

2. U suurtagelisa horumarinta shakhsiyaddiisa oo saameyneysa jirka, fikirka, ruuxa, shucuurta iyo akhlaaqda

3. Ku beerta waddaninimo kuna barbaarisa midnimada shacbiga Soomaaliyeed;

4. Siisa aqoon guud, cilmi, farsamo iyo xirfad,

5. Barta degaankiisa, dhawriddiisa iyo ka faa'iideysiga kheyraadkiisa

6. Barta falsafadda dimoqaraadiyadda, mabaadi'da guud ee Dastuurka iyo shuruucda aasaasiga ah ee Qaranka;

7. Barta in ay shaqadu tahay aasaaska nolosha, kuna beerta dhaqannada wanaagsan ee shaqada;

8. Barta iskaashiga iyo is fahamka Shucuurta Adduunka, gaar ahaan kuwa Carbeed.

Qod. 3aad

(Noocyada Waxbarashada)

Waxbarashada Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxa ay noqon kartaa mid Dawladeed iyo mid Ahli ah.

Qodobka 4aad

QAYBTA WAXBARASHADA

Qaybaha Waxbarashada Dalka J.D.S. Waxa ay yihiin.

1. Waxbarashada Tooska ah iyo

2. Waxbarashada Dadban.

Qodobka 5aad

HEERARKA WAXBARASHADA TOOSKA AH

Heerarka Waxbarashada tooska ahi waxa ay u kala baxaan sidatan:

1. Dugsiyada Qur'aanka iyo Xannaanada Caruurta.
2. Heerka Koowaad (Waxbarashada Asaasiga ah)
3. Heerka Labaad (Dugsiyada Sare)
4. Heerka Saddexaad (Tacliinta Sare oo aanu sharciga-ni khuseyn).

QAYBTA LABAAD

DUGSIYADA QUR'AANKA iyo XANNAANADA CARUURTA

Qodobka 6aad

Dugsiga Qur'aanka

Ujeeddooyinka laga leeyahay Dugsiga Qur'aanka waxa ay yihiin in Ilmaha:

1. La baro Qur'aanka Kariinka ah, laguna rabeeyo jaca ylka Diinka Islaamka.
2. Lagu barbaariyo anshaxa iyo asluubta wanaagsan.
3. Lagu barbaariyo jacaylka waalidkiisa, macallinkiisa iyo jiiraan kiisa.
4. Lagu barbaariyo la dhaqanka faciisa.

Qodobka 7aad

DUGSIYADA XANNAANADA CARRUURTA

Ujeeddooyinka laga leeyahay Dugsiga Xannaanada Caruurta waxa ay yihiin in ilmaha 3-6 jir ah:

1. La baro Qur'aanka Kariimka ah, laguna rabbeeyo jacalka Diinta Islaamka.
2. Lagu rabbeeyo anshaxa wanaagsan sida maamuuska, naxariista, saaxiibnimada iyo daryeelka hantida
3. Lagu barbaariyo xagga dhismaha jirka & maskaxda
4. Lagu dhiirrigeliyo hal abuurka, la dhaqanka faciisa iyo jacaylka dadkiisa iyo dalkiisa.

Qodobka 8aad

(Lahaanshaha iyo maamulka Dugsiyada Qur'aanka iyo) ka dhallinyarada, barashada muusikada, kashaafadda iyo

Xannaanada Carruurta

1. Dugsiyada Qur'aanka iyo Xannaanada Carruurta waxa yeelan kara dawladda ama dadweynaha.

2. Dugsiyada Qur'aanka iyo Xannaanada Carruurta ee dadweynaha waxa ka mas'uul ah maamulkooda, dhismahooda iyo qalabeyntooda Cidda leh, iyada oo ay dawladdu siineyso daryeel iyo kormeer.

3. Dugsiyada Xannaanada Carruurta ee Dawladda waxa dhismahooda, qalabayntooda iyo maamulkooda ka mas ul ah Dawladaha Hoose ee Degmooyinka.

QAYBTA SADDEXAAD

WAXBARASHADA HEERKA KOOWAAD W. ASAASIGA AH

Qodobka 9aad

UJEEDDO: 'WAXBARASHA HEERKA KOOWAAD

Waxbaashada Asaasiga ahi waa saldhigga Waxbarashada Dalka. Waxbarashada heerkani waa in ay ardayga.

1. ku barbaarisaa barashada iyo ku dhaqanka Diinta Islaamka, anshaxa wanaagsan iyo waddaniyada.

2. ka caawisaa dhismaha jirka. maskaxda iyo shakhsiyadda.

3. siisaa awood aqooneed iyo xirfadeed.

Qodobka 10aad

KHASABNIMADA WAXBARASHADA ASAASIGA AH

Waxbarashada Asaasiga ah, oo ay muddadeedu tahay 8 Sano, waa khasab waana xaq ay u siman yihiin carruurta gaartay da'dugsiyeedka.

Qodobka 11aad

MAJAANINIMADA WAXBARASHADA ASAASIGA AH

Waxbarashada asaasiga ah ee dawladdu waa lacag la'aan

Qodobka 12aad

Isku Qoritaanka Dugsiyada Asaasiga ah

1. Dugsiyada Asaasiga ah ee J.D.S. Waxaa isku qori kara ilmo dhammaystay 6 jirnimo, kana weyneyn 14 jir.

2. Da'da kor ku xusan waxa lagu xaqiijinayaa warqadda dhalashada, go'aan dhakhtar ama go'aan guddi dugsi.

QAYBTA AFRAAD

## WAXBARASHADA HEERKA LABAAD

### Qodobka 13aad

(Ujeeddooyinka Waxbarashada Heerka Labaad)

Waxbarashada Heerkani waa in ay bixiso tacliin kala duwan oo ay soo saarto qof,

1. Aamminsan kuna dhaqmo Diinta Islaamka.
2. Leh anshax wanaagsan, waddaniyad iyo biseyl aqoonheed oo u hoggaansama dhaqanka iyo shuruucda Dalka.
3. Leh Asaas Seynis, teknooloji, aqoon iyo xirfado oo Awoodi kara kor u qaadidda tayada noloshiisa iyo tan bulshadiisa.
4. Leh awood uu ku sii wadan karo tacliinta Sare.

### Qodobka 14aad

### NOOCYADA HEERKA LABAAD

Noocyada Heerka Labaad waxa ay u qaybsami karaan.

1. Dugsiyada Sare ee caamka ah oo muddada wax lagu bartaa ay tahay afar sano.
2. Macaahidda Diinta Islaamka oo mudda wax lagu bartaa ay noqon karto afar sano.
3. Dugsiyada Sare ee farsamada oo muddada wax lagu bartaa ay noqon karto saddex ama afar sano.
4. Dugsiyada Saer ee mihnadaha oo muddada wax lagu bartaa ay noqon karto laba ama seddex sano.

### Qodobka 15aad

Isku qoritaanka Dugsiyada Heerka Labaad

Dugsiyada heerka labaad waxaa loo oggolaan karaa in uu galo arday soo dhammeystay waxbarashada asaasiga ah.

## QAYBTA SHANAAD

## MANHAAJKA WAXBARASHADA

### Qodobka 16aad

### QORSHAHA MANHAJKA

Heer kasta oo waxbarasho waa in uu lahaadaa qorshe manhaj ka tarjumaya ujeeddooyinka waxbarashada ee J.D.S. uu ansixiyo Wasiirku.

### Qodobka 17aad

### TILMAAMAHA QORSHAHA MANHAJKA

Jorshe Manhaj kasta waa in uu ka koobnaadaa.

Ujeeddooyinka guud ee waxbarashada J.D.S. Iyo kuwa muucyinka ah oo maaddo-maaddo iyo fasal fasal ah.

2. Muqarar muujinaaya mukhtaweyaadka Waxbarasha ah maaddo maaddo iyo fasal fasal.

3. Habka waxdhigista.

4. Qalabka Waxbarashada.

5. Muddada Waxbarashada iyo jadwalka toddobaadka.

6. Qaabka qiimeynta fulitaanka manhajka.

Qodobka 18aad

MAADDOOYINKA WAXBARASHADA

1. Maaddooyinka lagu barahayo dugsiyada dowladda heerarkooda kala duwan waxa ay ku soo bixi xeernidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

2. Waxa khasab ah in lagu dhigo dugsiyada Qaranka oo dhan maaddooyinka Diinta Islaamka, Af Soomaaliga iyo Af Carabiga.

3. Maaddo kastaa waa in ay yeelataa kitaab saldhig u ah muqarrarka fasal kasta.

Qod. 19aad

(Afafka Waxbarashada)

Afafka rasmi ahaan wax lagaga barahayo dugsiyada dowladda ee J.D.S. waxa ay yihiin sidatan:

1. Dugsiyada heerka 1aad: Soomaali iyo Carabi;

2. Dugsiyada Sare ee Caamka ah iyo Macaahidda Diin Soomaali iyo Carabta.

3. Dugsiyada farsamada iyo mihnadaha: Soomaali, Carabi ama luqaddii kale ee loo baahdo.

Qod. 20aad

(Nashaadka Ardayga)

Muqarrarka rasmiga ah ee dugsiyada waxa lagu kaabayaa nashaadka isboortiga, Ubaxa Kacaanka mucaskaraadka Dhallinyarada, Barashada Muusikada Kashaafadda iyo hawlihii kale ee kobcinaya hiwaayaadka ardayga.

QAYBTA LIXAAD

MACALLINKA

Qod. 21aad

(Shuruudaha Xulashada Macallinka)

Waxaa Macallin noqon kara qof buuxiya shuruudahan:

1. Waa in uu leeyahay aqoon ah ama u dhiganta heerka

2aad ama 3aad ee tacliinta dalka, waana in uu soo qaatay tababar macalliinnimo;

2. Waa in uu leeyahay akhlaaq fiican, kana fayow yahay cudurrada la is qaadsiiyo, aanu lahayn iin wax u dhimi karta gudashada xilkiisa.

Qod. 22aad

(Xilka Macallinka)

Xilka Macallinku waa:-

1. Waxbaridda iyo barbaarinta ardayda;
2. Fulinta manhajka dugsiga;
3. Qiimeynta waxbarashada ardayga;
4. Ka kaalmaynta maamulaha xagga maamulka dugsiga;
5. Ka warbixinta manhajka waxbarashada;
6. Ka qaybgalka nashaadka dugsiga iyo ilaalinta nabadgelyada ardayga fasalka dhexdiisa.

Qod. 23aad

(Xeer Habaynaaya Xulka, Xilka iyo Habaynta Macallinka)

Faahfaahinta qodobbada 21aad, 22aad iyo habka hawlgelinta Macallinka waxa ay ku soo bixi xeer nidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

Qod. 24aad

(Shaqo Qoridda Macallinka)

Shaqo qoridda Macallinka iyo xuquuqdiisa waxa lagu maamulayaa sharciga Shaqaalaha Dowladda.

QAYBTA TODDOBAAD

MAAMULKA DUGSIYADA

Qod. 25aad

(Qeexid Dugsi)

Dugsi waa goob leh deegaan habboon, laguna fuliyo wax barasho nidaamsan oo ujeeddo leh.

Qod. 26aad

(Shuruudaha Furid Dugsi)

Dugsi waxa lagu furi karaa tiro arday oo aan ka yarayn 25 iyo dhismo ka kooban qol ama qolal suurtogelinaya furidda dugsiga.

Qod. 27aad

(Qaabka Dhismo Dugsi)

Qaabka hindisaha iyo dhismaha qolalka waxbarashada waxa xaddidi talooyin ka soo baxa Wasiirka, iyadoo la tixgelinayo duruufaha deegaannada kala duwan ee dalka.

Qod. 28aad

(Xeer Nidaaminaya Maamulka Dugsiga)

Dugsi kastaa waa in uu yeeshaa qaab maamul oo tilmaamaya hoggaaminta iyo hubinta fulitaanka hawlaha dugsiga.

Faahfaahinta qaabka maamulka dugsi waxa uu ku soo bixi xéernidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

Qodobka 29aad

MAAMULE DUGSI

Dugsi kasta oo leh ugu yaraan afar fasal waa in loo ma gacaabaa Maamule.

Qodobka 30aad

SHURUUDAHA MAGACAABIDDA MAAMULE DUGSI

Maamule Dugsi waxaa loo magacaabi karaa Macallin.

1. Buuxiyey shuruudaha Macallinnimo ee ku xusan Qodobka 21aad Sharcigan.
2. Leh khibrad Macallinnimo oo aan ka yar n 3 Sano.
3. Ka fayow cudurada la is qaadsiiyo oo aan lahayn iin wax u dhimi karta gudashada xilkiisa.
4. Leh hoggamin, hawlkrnimo iyo akhlaaq wansgsan.

Qodobka 31aad

KILKA MAAMULE DUGSI

Xilka Maamule Dugsi waa:

1. Hawlgelinta Macallimiinta iyo fulinta barnaamijka Waxbarashada.
2. ilaalinta hantida Dugsiyada.
3. Go'aaminta qiimeynta waxbarashada ardayga.
4. Habeynta iyo xafjdidda dekumentiga Dugsiga.
5. Fulinta xeerarka dugsiyada.
6. Hagaajinta xiriirka dugsiga iyo beesha.
7. Qiimeynta iyo ka warbixinta shaqaalaha iyo xaalad da Dugsiga.
8. ka warbixinta manhajka waxbarashada.

9. Ilaalinta nabadgeiyada iyo nadaafadda dugsiga iyo bulshadiisa (adray iyo shaqaale).

10. Xiriirinta dugsiga iyo xafiiska waxbarasho ee uu toos u hoos yimaado.

11. ku taakulaynta barasha gudashada xilkiisa,

12. horumarinta nashaadka Dugsiga.

Qodobka 32aad
MAAMULE KU XIGEEN DUGSI

Dugsi kasta oo ah heerka koowaad oo ka kooban ugu ya raan 8 fasal ama ah heerka labaad oo ka kooban ugu yaran 4 fasal waxa uu yeelan karaa maamule ku xigeen iyo xoghaye.

Qodobka 33aad
GUDDIYADA DUGSIYADA

Dugsi kasta waxa uu yeelanayaa guddi maamul waxba rasho iyo guddi waalid, kuwaasoo xubnahooda iyo xilalkoo da lagu faahfaahin doono xeer nilaamiye uu soo saaro W/ka

Qodobka 34aad

Mas'uuliyadda Waxbarashada ee Dawladaha Hoose.

Dhismaha, qalabeynta, dayctirka iyo maamulka dugsi yada Qur'aanka, xanaanada caruurta, waxbarashada asaa siga ah iyo dhaqaalaha guriga waxaa ka mas'uul ah dawla daha hoose ee Degmooyinka.

Qod. 35aad
(Hoggaamninta Waxbarashada)

Hoggaamninta hawlaha Waxbarashada gobol iyo degmo kasta waxa Madax ka ah Guddoomiyaha Maamulka Dawlad da ee Gobolka ama Deg. Iyada oo Gobol iyo Degmo kasta uu yeelanayo Madax Waxbarasho oo u xilsaaran fulinta maamulka hawlaha waxbarashada.

Qod. 36aad
(Anshaxa Ardayda)

1. Ardayga ku xadgudba xeerka iyo nidaamka dugsiga, sharafta iyo ciseynta Macallimiinta iyo Madaxda kale, ama u gefa asluubta toosan waxa uu mutaysan edbin,

2. Waxa ka reeban Macallinka iyo Maamulka dugsiga in ay ardayga u geystaan falal wax u dhimi kara jirkiisa, maskaxdiisa ama shakhsiyaddiisa.

3. Faahfaaihnta xubnaha qodobkani waxa ay ku soo bixi xeernidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

QAYBTA SIDDEEDAAD

WAXBARASHADA DADBAN

Qod. 37aad

(Qeexidda Waxbarashada Dadban)

Waxbarashada Dadbani waa waxbarasho nidaamsan oo loogu talagalay dadka waaweyn ee ay da'doodu gaartay 15 jir.

Qod. 38aad

(Ujeeddooyinka Waxbarashada Dadban)

Waxbarashada Dadbani waa in ay:-

1. Qofka u suurtagelisaa kor u qaadidda awooddiisa aqooneed, farsamo, xirfadeed iyo kordhinta awooddiisa wax-soo-saar dhaqaale;

2. Qofka siisaa awood uu ku sii wadan karo waxbarashadiisa;

3. Tahay mid ku habboon dadka la siinayo, waana in loo eegaa hadba sida looga baahan yahay xagga horumarinta bulshada, dhaqaalaha iyo dhaqanka.

Qod. 39aad

(Noocyada Waxbarashada Dadban)

Noocyada Waxbarashada Dadbani waxa ay ka koonaan-karaan, guud ahaan qaybahan:-

1. Akhris Qorista.

2. Waxbarasho Guud oo ka sarreysa akhris qorista ee heerar kala duwan leh.

3. Barasho Xirfad.

Qod. 40aad

(Mas'uuliyadda Waxbarashada Dadban)

1. Wasaaraddu waa in ay dhiirrigelisaa faafinta waxbarashada dadban iyada oo la kaashanaysa Wasaaradaha, Hay'adaha madaxa bannaan iyo Dawladaha Hoose ee Degmooyinka.

2. Wasaaraddu waxa ay talo ka bixineysaa dejinta siyaasadda guud iyo barnaamijyada waxbarashada dadban.

3. Barashada xirfadaha kala duwan ee waxbarashada kale ee qaranka.

dadban waxa fulin kara Wasaaradda ka sokow, Hay'adaha kale ee Qaranka.

Qod. 41aad

(Afafka Waxbarashada Dadban)

Afafka Asaasiga u ah Waxbarashada dadban waa afka Soomaaliga iyo kan Carabiga.

Qod. 42aad

(Shahaado Siinta)

Qof kasta oo dhammeysta barnaamijyada waxbarashada dadban midkood waxaa la siin karaa shahaado aqoonsi ah.

Qod. 43aad

(Waxbarashada Haweenka)

Waa in ahmiyad gaar ah la siiyaa horumarinta waxbarashada haweenka.

QAYBTA SAGAALAAD

WAXBARASHADA AHLIGA AH

Qod. 44aad

Waxbarashada ahliga ahi waa waxbarasho nidaamsan, manhaj ahaan iyo maamul ahaanba, oo ay bixiyaan mu'asasado waxbarasho oo aanay dawladi lahayn oo si sharci ah uga diiwaangashan Wasaaradda.

Qod. 45aad

(Danta laga leeyahay Waxbarashada Ahliga ah)

Danta laga leeyahay waxbarashada ahliga ah waxa ay tahay:-

1. In ay kordhiso fursadaha waxbarasho ee dalka;

2. In ay kaalin ka qaadato kordhinta tayada waxbarashada dalka.

Qod. 46aad

(Noocyada iyo Heerarka Waxbarashada Ahliga ah).

1. Noocyada waxbarashada ahliga ahi waxaa ay noqon karaan:-

b) Waxbarasho ahli ah oo toos ah;

t) Waxbarasho ahli ah oo dadban;

2. Heerarka Waxbarashada Ahliga ahi waxay noqon karaan:—

b) Dugsiyada Qur'aanka iyo Xannaanada Carruurta.

t) Heerka Koowaad.

j) Heerka Labaad.

Qodobka 47aad

MANHAJKA WAXBARASHADA AHLIGA AH

1. Mu'asaasad kasta oo bixisa waxbarasho ahli ah waa in ay nooc iyo heer kasta oo waxbarasho oo ay bixiso u leeda hay qorshe manhaj ay oggolaatay Wasaaraddu.

2. Manhajka waxbarashada ahliga ahi waa in uu ku salaysnaadaa ka dugsiyada Dawladda.

3. Qorshaha manhajka waxbarashada dugsi kasta oo ahli ah waa in si cad oo tifaftiran loogu muujiyaa xubnaha asaasiga uga ah manhajkaasi. Tifaftirka xubnahaasi waxa ay ku soo bixi xeernidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

Qodobka 48aad

AFAFKA WAXBARASHADA AHLIGA AH

1. Afka Soomaaliga iyo afka Carabiga waa afafka ras miga u ah waxbarashada ahliga ah.

2. Waxaa bannaan in afaf kale laga barto dugsiyada ahliga ah heer kastaba.

2. Heerarka Waxbarashada ahliga ahi waxay noqon

Qodobka 49aad

MAADDOOYINKA KHASAB AH

Waxaa khasab ah in lagu dhigo dugsiyada ahliga ah oo dhan maaddooyinka Diinta Islaamka, af Soomaaliga iyo af Carabiga.

Qodobka 50aad

(Lahaanshaha Dugsi Ahli ah iyo shuruudaha aqoonsigiisa)

1. Dugsi ahli ah waxa yeelan karta mu'asaasad waxba rasho oo Soomaaliyeed oo si sharci ah u diiwaangashan.

2. mu'asaasad waxbarasho waxa si sharci ah loo dii waangelin karaa marka ay fuliso shuruudaha hoos ku qoran

b) Keenid qorsha manhaj waafaqsan qod. 47aad ee sha rcigan.

t) Caddeyn hayn macallimiin ku filan baahida dugsi

ga oo buuxiya shuruudaha xulashada macallinka ee qodobka 21aad ee sharcigan.

j) Caddeyn awood hantiyeed oo u qalanta fulitaanka hawlaha dugsiga.

3. Dugsi ahi ah waxa la aqoonsan karaa.

b) Haddii ay leedahay mu'asaasad waxbarasho oo si sharci ah u diiwaangashni.

t) Kal dib marka wasaaraddu ay ansixiso goobta iyo qaabka dhisma ee dugsiga, qalabkiisa, maamulkiisa iyo macallimiintiisa.

4. Tifaftirka qodobkani waxa uu ku soo bixi xeernidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

Qod. 51aad

(Maamulka Waxbarashada Ahliga ah)

Mu'asasad waxbarasho kasta oo ahli ahi waa in ay yeelataa guddi maamul oo ka kooban xubno ay soo xusheen mulkiilayaasha mu'asasaddu, xubno ka socda waalidka iyo wakiil ka tirsan Wasaaradda.

Qodobka 52aad

(Qiimeynta Waxbarashada Ahliga ah)

Qiimeynta, kormeerka iyo shahaaddo siinta waxbarashada ahliga ah waxa ka mas'uul ah Wasaaradda.

Qodobka 53aad

AWOOD XIRID AHLI AH

Wasaaraddu waxa ay awood u leedahay in ay mu'asasad waxbarasho ka xirto dugsigii fulin waaya shuruudihii lagu aqoonsaday dugsiga.

Qodobka 54aad

XAFIISKA WAXBARASHADA AHLIGA AH

Wasaaraddu waxay yeelanaysaa xafiis u xilsaaran waxbarashada ahliga ah.

QEYBTA TODOBAAD

WAXBARSHAADA GAARKA AH

Qodobka 55aad

QEEXIDDA WAXBARASHADA GAARKA AH

Waxbarashada gaarka ahi waa waxbarasho loogu talaga-

lay dadka iinta ku leh jirka ama maskaxda sida indhoolayaasha, dhegooleyaasha iyo naafada.

Qodobka 56aad

BAAHIDA WAXBARASHO EE ILMAHA IINTA LEH

Iimo kasta oo iin lihi waa in uu helaa waxbarasho ku saleysan baahidiisa iyo awooddiisa, lana gaarsiiyo heer uu is ku filnaado.

Qodobka 57aad

FULINTA WAXBARASHADA GAARKA AH

Barnaamijyada lagu hormarinayo waxbarashada gaarka ah waxa wadajir u fulinaya Wasaaradda, Hay'adaha kale ee Qaranka ee ku shaqo leh daryeelka bulshada & D/Hoose.

Qodobka 58aad

(Shuruudaha Xarumaha Waxbarashada Gaarka ah)

Xarun kasta oo lagu fulinayo waxbarasho gaar ah waa in ay leedahay macallimiin u tababaran waxbarashadaasi iyo Shaqaale Caafimaad.

Qodobka 59aad

(Xiriirinta iyo Qiimeynta Waxbarashada Gaarka ah)

Wasaaradda ayaa guud ahaan u xil saaran xiriirinta, kormeerka iyo qiimeynta barnaamijyada waxbarashada gaarka ah.

Qod. 60aad

(Xafiiska Waxbarashada Gaarka ah)

Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarintu waxa ay yeelaneysaa Xafiis u qaabilsan waxbarashada gaarka ah.

QYBTA KOWIYOTOBANAAD

QIIMEYNTA WAXBARASHADA

Qod. 61aad

Wasaaradda ayaa ka mas'uul ah qiimeynta waxbarashada dalka heerarkeeda koowaad iyo labaad (mid dawladeed iyo mid ahli ahba) iyo tababarka macallimiinta.

Qod. 62aad

(Imtixaanka Naqliga ah)

Sannad dugsiyeed kasta dhammaadkiisa waa in arday

kasta waxbarashadiisa la qiimeeyaa, la diiwaangeliyaa, la kaydiyaa lana ogeysiiyaa ardayga natiijada imtixaanka.

Qod. 63aad
(Imtixaanka Shahaadada)

Arday kasta oo dhammaysta heer waxbarasho (mid dawladeed iyo mid ahli ah) waa in uu fariistaa imtixaanka shahaado ee Qaranka.

Qod. 64aad
(Xeer habaynaya Imtixaanka Naqliga ah)

Habka imtixaanka naqliga, ka shahaadada iyo kuwa waxbarashada dadban waxa ay ku soo bixi xeernidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

Qod. 65aad
(Muddada Sannad Dugsiyeedka)

Muddada sannad dugsiyeedku kama yaraan karto 35 toddobaad, kamana badnaan karto 39 toddobaad.

Qod. 66aad
(Burin)

Waxaa la buriyey sharci iyo xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan.

Qod. 67aad
(Dhaqan Gelin)

Sharcigani waxa uu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 12 Feb. 1987

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Madaxweynaha J.D.S. Lambr 8 taariikh 20 Jan. 1987 Ujeeddo Magacaabid Nootaayo.—

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 8 ee 15.2.61 iyo sharci ga lamabar 1 ee 2.3.62, kuna saabsan habeynta hawlaha Nootaayada.

MARKUU ARKAY: Qodobka 2aad, sharciga lambar 7 ee 2.2.86, oo awood u siinaya Madaxweynaha J.D.S. in uu toos iyo tartan la'aan u magacaabo nootaayo qofkii mudan

MARKUU TIXGELIYEY: In J/le Jaamac Maxamed Qaalib uu si fiican u haTan karo, xag aqoon sharci iyo xag kal-soonida, minnaadda nootaayanimada.

MARKUU TIXGELIYEY: Soo jeedinta Wasaaradda Garsoor ka iyo Arrimaha Diinta (Warqad lam. MG/4/23-360 ee 4.3.86)

WUXUU SOO SAARAYAA

Qodobka 1aad

Waxaa J/le Jaamac Maxamed Qaalib loo magacaabay NOOTAAYO, wuxuuna hawlihiisa ka fulinayaa, xafiiska ka furanayaa magaalada Muqdisho.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 20 Jan. 1987.

Waan Aragnay ee Diiwaangelinnay.

Diiwaanka L. 1 Bog. L. 25

da oo ah maaddo maaddo iyo fasal fasal.

Muqdisho, 11.2.87.

Hantidhowraha Guud.

Dr. Xuseen Cabdulle Cali.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

# QEYBTA SAD/XAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

### MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

MARKUU ARKAY: In uu soo qortay J/le Maxamed Cusman Bucul.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay B/keyd Lr. 26046 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 4.037,55/1 kuna qoran magaca J/le Maxamed Cusmaan Bucul sida ku cad warqadda Lam. 002207 ee Tr. 27.1.87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: Qod. 96 sharciga lam. 2 ee Tr. 9.9.62dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega War. Lambar. 26046 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keedka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan sh.so. 4.037,55 kuna qoran magaca J/le Maxamed Cusmaan Bucul.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keedka Soomaaliyeed Laanta X. in ay siiso J/le Maxamed Cusmaan Bucul lacagta caddadeedu tahay sh,so, 4.037,55 oo ah keedkii B/keyd kor ku xusan mar key kasoo waraagto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdi Salaad Shongole

L. 80

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

MARKUU ARKAY: In uu soo qortay J/le Saciid Maxamed Indhayare.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Buug Lam. 484. Kuna jirto lacag dhan sh.so. 155.763,32. Kuna qoran magaca J/le Saciid Maxamed Indhayare sida ku cad warqadda lam. 1523 ee Tr. 15.3.87, ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keedka Soomaaliyeed laanta Afaraad.

HADDUU ARKAY: Qod. 96 sharciga lam. 2 ee Tr. 9.9.62dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/Buug lam. 484. Laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keedka Soomaaliyeed Lanta 4aad kuna jirto lacag dhan sh.so. 155.763,32 Kuna qoran magaca J/le Saciid Maxamed Indhayare.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keedka Soomaaliyeed laanta 4aad in ay siiso J/le Saciid Maxamed Indhayare lacagta caddadeedu tahay sh.so. 155.763,32 oo ah keedkii J/Buug kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan kayareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 16.3.87.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdi Salaad Shongole

I. 81

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

MARKUU ARKAY: In uu soo qortay J/le Maxamuud Maxamed Xaaji Ibraahim.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay J/War. Lambar 0392229 kuna jirto lacag dhan sh,so, 30.000 kuna qoran magaca J/le Maxamuud Maxamed X. Ibraahim sida ku cad warqadda lam. 4663. ee Tr. 16.3.87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L. Q. X. G.

HADDUU ARKAY: Qod. 96 sharciga lam. 2 ee Tr. 9.9.62dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega War. Lambar. 0392229 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keedka Soomaaliyeed Laanta Q.X.G. kuna jirto lacag dhan sh.so. 30.000 kuna qoran magaca J/le Maxamuud Maxamed X. Ibraahim

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Garbahaaray in ay siiso J/le Maxamuud Maxamed X. Ibraahim lacagta caddadeedu tahay sh.so. 30.000 oo ah keedkii J/War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horay sa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 16.3.87.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdi Salaad Shongole

L. 82

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

Ku. Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Xamar
Uj: Baafin Jeeg War. ee Lam. 0616908.

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin J/War. Lambar 061908.

HADDUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga iyo keyd dka Laanta Burco ee Taarijkh 14.3.87.

HADDUU ARKAY: Qod. 69, D,L, 9.9.65 lumid J/War. Lam. 0616908 ee sh.so. 100.000 kuna qoran Maxamuud Cumar Xalane lagana sameeyay Laanta Burco Tr. 3.3.87.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo J$War. ee kor ku xusan J/ie Maxamud Cumar Xalane markii ay ka soo wareegto 20 Casho aguna shaaciyo xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee D. Xamar

WAXAA LAGAA CODSANAYAA

In Gacanta laga saaro Jeega cusub ee la sameyndoono J/le Maxamud Cumar Xalane iyadoo la sugayo mudada kor xusan.

Burco. 5.3.87.

UDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO.
Dr. Abuukar Islaw Cumar

. 83

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

MARKUU ARKAY: In uu soo qortay J/le Caasha Cumar Maxamad.

ADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay J/War. Lambar 737031. Kuna jirto lacag dhan sh.so. 10.000 kuna qoran magaca J/le Caasha Cumar Maxamed sida ku cad warqauda lam. 4939 ee Tr. 21.3.87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta.

ADDUU ARKAY: Qod. 96 sharciga lam. 2 ee Tr. 9.9.62dii

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lam. 737031. ga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan sh.so. 10.000 kuna oran magaca J/le Caasha Cumar Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keedka Soomaaliyeed laanta 2aad Hargeysa in ay siiso J/le Caasha Cumar Maxamed lacagta caddadeedu tahay sh.so. 10.000 oo ah keedkii J/War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maa lmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafin ta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishort-aag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 21.3.87.

UDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdi Salaad Shongole

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

Uj: Baafin Jeeg War. Ee Lambar 0032611.

ADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin J/War. ee lumay.

ADDUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga iyo keydka Laanta Burco.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Lumid J/War. ee Lam. 00326 kuna qorayd sh.so. 24,000 kuna qoran J/le Jaamac Maxamed Faahiye Taariikh 5.6.85 L. Burco.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegaas kor ku xusan J/le Jaamac Maxamed Faahiye markii ay ka soo wareegto muddo 20 casho gudahood ah laguna shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Xamar.

WAXAA LAGAA CODSANAYAA

In Gacanta laga saaro Jeega cusub ee la sameyndoono je Jaamac Maxamed Faahiye iyadoo la sugayo mudada or ku xusan.

Burco, 4.9.86.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO.
Dr. Abuukar Islaw Cumar

85

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

Uj: Baafin J/War. Lam. 0711500 ee Tr. Tahay 2.2.1987,
MARKUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafinta J/War. ee lumay.

MARKUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga iyo keydka Laanta Burco.

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D,L, 9.9.65. Lumid J/War. ee Lumay ee Lam. Yahay 0711500 ee xanbaarsanaa lacag dhan sh.so. 100.000 kuna taariikheysan 2.2.87 kuna qoraa J/le Daahir Axmed Xuseen, lagana sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Laanta Hargeysa.

WUXUU GO'AAMIYAY

In loo cusboonaysiiyo J/War. ee kor ku xusan J/le Daahir Axmed Xuseen, kadib marka ay ka soo wareegto muddo dhan 20 casho, laguna shaaciyo Baafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegaas cusub ee la samayndoono in Gacanta laga saaro J/le Cali Cubeed Ayaalle, iyadoo la sugayo mudada Kor ku Xusan.

Burco, 2.3.87.

UDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO.
Dr. Abuukar Islaw Cumar

86

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

ADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Ibraahim Cabdullaahi Rooble.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay J/War. Lambar 0592154 kuna jirto lacag dhan sh,so, 100.000 kuna qoran magaca J/le Daahir Xasan Cali sida ku cad warqadda Lam. 7033 Tr. 30.3.87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis. Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 96 sharciga lam. 2 ee Tr. 9,9,62dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lam. 0592154. aga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed aanta Q.X. Guud kuna jirto lacag dhan sh,so, 100.000 kuna qoran magaca J/le Daahir Xasan Cali.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L. Burco ay siiso J/le Ibraahim C/laahi Rooble Lacagta Cadadeedu hay sh,so, 100.000 oo ah keydkii J/War. kor ku xusan mar ey ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood la ga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmi ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 31.3.87.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdi Salaad Shongole

. 87

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Ibraahim C/laahi Rooble.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay J/War. Lambar 0616472 kuna jirto lacag dhan sh,so, 100.000 kuna qoran J/le Amina Maxamed Ducaale sida ku cad warqadda Lam. 7033 Tr. 30,3,87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Q.X. Guud.

HADDUU ARKAY: 96 sharciga Lam. 2 ee Tr. 9,9,1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lam. 0616472 aga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed aanta Q.X. Guud kuna jirto lacag dhan sh,so. 100.000 kuna ran magaca J/le Aamina Maxamed Ducaale

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L. Burco in ay siiso J/le Ibraahm C/laahi Rooble lacagta cadadeedu tahay sh.so. 100.000 oo ah keydkii J/War. kor ku xusan mar key ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga biiaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 31.3.87.

UDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdi Salaad Shongole

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

MARKUU ARKAY: Arji uu soo qortay J.le Mubaarak Yuusuf Cali;

HADDUU TIXGELIYEY: in uu dhumay Jeeg Wareega Lam. 0614536 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Ceydiid Ibraahim Cali sida ku cad warqadda lam. 7033 tr. 30.3.87 ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee tr. 9.9.62dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0614536 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Q.X.G. kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Ceydiid Ibraahim Cali.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco in ay siiso J.le Mubaarak Yuusuf Cali lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah beddelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqaraadiga Soomaaliyeed haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 31.3.1987

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shongole)

L. 89

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Buug Kayd

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Bashiir Xalane Abtidoon.

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Jeeg War. L. 1380 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.505,73 kuna qoran magaca J.le Bashiir Xalane Abtidoon sida ku cad warqadda L. 468 ee tr. 16.11.86 ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee tr. 9.9.62dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd L. 1380 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.505,73 kuna qoran magaca J.le Bashiir Xalane Abtidoon.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley in ay siiso J.le Bashiir Xalane Abtidoon lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 30.505, 73 oo ah beddelkii Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.11.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shongole)

L. 90

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

MGH/23/86 Taariikh 20.8.86

UJEEDDO:- Digreeto Cusboonaysiin Labada Jeeg ee Wareega ee lumay Lambarradooduna kala yihiin:-

1) J.W. No. 0243479 ee 19.5.76 lacagtiisu tahay 40,000/= kuna qoran magaca Xuseen Suudi, laga sameeyey Laanta Burco.

2) J.W.No. 0190887 ee 7.6.86 Lacagtiisu tahay 50,000/= Shilin kuna qoraa magaca Aadan Jaamac Daahir lagana sameeyey Bangiga Laanta Marka.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Khadiija Axmed Ducaale, ee ku taariikhaysan 10.8.86 ee ay ku codsanayso in loo cusboonaysiiyo Jeegagga Wareega ee lumay ee kor ku xusan.

MARKUU ARKAY: Taarka Bangigu Laamihiisa iyo Xisaabaha Guud u wada qoray ee ku taariikhaysan 24.7.86.

MARKUU ARKOY: Xaashida Lambarkeedu yahay 0797 ee Taariikhdeedu tahay 11.8.86, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Hargeysa, ayna ku caddeeyeen in Jeegaggaas Wareega ee lumay ee Lambarradooda iyo lacagtooda iyo taariikhdooduba kor ku xusan yihiin, lagana kala sameeyey kan koowaad Laanta Burco, qokan labaadna Bangiga Laanta Marka, kan koowaad ku qoran yahay Xuseen Suudi, kan labaadna ku qoran yahay Aadan Jaamac Daahir.

MARKUU ARKAY: In Jeegaggaas Wareega ee lumay lacagtooda ay iska leedahay Khadiija Axmed Ducaale.

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xxrka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIY9Y

In la kansal gareeyo labada Jeeg Wareega ee lumay lambarkoodu kala yahay 0243479 iyo 0190887 loona cusboonaysiiyo Khadiija Axmed Ducaale, cusboonaysiintana gacanta laga saaro iyada ama ciddii awood ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib maalinta Faafinta lagu soo

GUDDOOMIYAHA MAX. G. W/GALBEED EE HARGEYSA
(Ibraahin Faarax Maxamed)